Qoyska Xaanshida Xaqiiqada

Natiijada Togan:

Ogeysiinta Natiijada Dhiigga Laga Qaaday Ciribta

Barnaamijka Baaritaanka ilmaha dhasha ee Minnesota

9tŜØI-ŭŜŘ Lw¢ I-yŘ M /C¢w ±I-ŃƛI-yŭ LŘŜyŭƛŦƛŜŘ, Family Fact Sheet—Somali

Immunoreactive Trypsinogen (IRT) Sareeya iyo Faraca 1 *CFTR* ee La Aqoonsaday

Maxaa lagu ogaaday baaritaanka dhallaanka cusub?

Baaritaanka ilmaha dhashay oo la sameeyay ayaa lagu ogaaday in ilmahaagu qabo heerka A sareeya ee IRT. IRT waa barootiin ay dhaliso beeryaradu. IRT ayaa kor u kici kara dhawr sababood awgood, uuna ku jiro cystic fibrosis (CF). Sabab la xiriirta in IRT uu sareeyay, dhiig laga qaaday ilmahaaga ayaa laga baaray 39 isbadel oo caan ah (faracyada) oo ku dhaca hide sidaha sababa CF (hide sidaha CFTR). Ilmahaaga ayaa la ogaaday inuu qabo hal isbadelka hide sidaha keena cystic fibrosis.

Maxay tani ka dhigan tahay?

Marka la helo keliya hal isbadelka hide sidaha keena cystic fibrosis, waxay u badan tahay in ilmahaagu uu sido hide sidaha CF (uusan xanuun qabin). Labo isbadellada side sidaha cystic fibrosis ah ayaa loo baahan yahay si qofku u qaado xanuunka CF, marka uma badna in ilmahaagu qabo xanuunka cystic fibrosis (xanuunsan). Maadaama baaritaanka ilmaha dhashay uusan baarin isbadel kasta oo ku dhaca hide sidaha cystic fibrosis, wali waxaa suuragal ah in ilmahaagu qabo isbadel labaad oo ku dhacay hide sidihiisa cystic fibrosis kaas oo keeni kara CF.

Maxaa xiga oo dhici kara?

Dhakhtarkaaga ayaa kaa caawin doona diyaarinta baaritaanka dheeraadka ah oo lagu sameeyo xarunta cystic fibrosis ayna sameeyaan taqasusleyaal aqoon u leh CF. Taqasusleyaasha ayaa samayn doona baaritaanka dhididka si loo ogaado haddii ilmahaagu qabo CF. Baaritaanka dhididka ayay u badan tahay in la mudeeyo marka ilmahaagu gaaro ku dhawaad hal bil jir. Ilmaha ka yar hal bil ayaan lahayn dhidid ku filan, marka waxaa haboon in la sugo inta ilmuhu xoogaa koraayo. Waxaad awoodi doontaa inaad la hadasho dhakhtarkaaga hide sidaha si aad wax uga waydiiso macnaha natiijooyinku u leeyihiin qoyskaaga.

Waa maxay cystic fibrosis?

CF waa cudur sababa in xab badan, oo isjiid ah uu abuurmo. Xabkaan ayaa keeni kara dhibaatooyinka neefsiga iyo caabuqyada sanbabada. Xabkaan ayaa sidoo kale ku adkayn kara jidhka inuu burburiyo cuntada.

Waa maxay dhibaatooynka caafimaad ee uu keeni karo?

CF ayaa qaab gaar ah u qabta ilmo kasta. CF waa cudur abidkiis qofka haynaaya kaas oo keeni kara dhibaatooyin caafimaad oo xun. Ilmaha qaba CF ayay ku dhici karaan:

- Miisaan kororka xun
- Saxaro oolyo ama saliid leh
- Kobaca liita
- Qufac iyo xiiq dheer
- Caabuqyada sanbabada

Carruurta qaba CF ayaa ka faa'iideysan kara daawaynta degdega ah ee taxadarka badan.

Waa maxay fursadaha daaweynta ee jira?

Inkasta oo aan CF daawo lahayn, haddana waa la maarayn karaa xanuunka. Daawooyinka suuragalka ah waxaa kamid noqon kara:

- Daawada enzymes ee dhakhtarku qoro si ay kaaga caawiso dheefshiidka cuntada
- Cunto caafimaad leh, oo koloriyo badan
- Feetamiinnada
- Daawooyin si looga hortago caabuqyada loona taageero neefsiga
- Qaababka looga caawiyo ka saarista xabka sanbabooyinka

Ilmaha qaba CF waa inay u tagaan dhakhtarkooda caadiga ah iyo dhakhtar ku taqasusay CF.

Dhigaalada

Tixraaca Macluumaadka Hiddo-sidaha:
http://ghr.nlm.nih.gov

Badbaadi dhallaankaaga Adoo U Maraya Baaritaano Aasaasi ah:
www.savebabies.org

Baaritaanka Koowaad ee Dhallaanka:
www.babysfirsttest.org

DEPARTMENT OF HEALTH
Newborn Screening Program, 601 Robert St. N., St. Paul, MN 55155
Taleefanka (800) 664-7772, Fakiska (651) 215-6285 ***turjumaano ayaa diyaar ah***
DIB-LOO-EEGAY 05/2019